NSW GOVERNMENT

What do I need to know if my child is expelled?

Parent/carer information

# Maxaan u baahan ahay inaan ogaado haddii ilmahayga la cayriyo?

## Macluumaadka xannaaneeyaha/waalidka

### Waa maxay cayrintu?

Cayrintu waa marka maamulaha, Agaasimaha iyo hogaanka Waxbarashadu ay u sheegaan ardeyga inay ka tagaan dugsiga oo aysan ku soo noqon. Cayrintu waa arin daran. Dhammaan iskudayada Waa in la sameeyaa si loo taageero ilmahaaga ka hor intaan la sameyn go'aan lagu cayrinayo.

Maamulayaashu waxay ku cayrin karaan ardayda laba sababood:

- Ardaydu haday muujinayaan dabeecad daran oo la saluugay iyo qorshayaasha lagu maareynayo dabeecadooda oo aan shaqeyn.
- Ardaydu waa 17 sanno jir ama ka weyn kamana ay qayb qaadan waxbarashada.

Maamulayaashu waxay ka fekeri doonaan sida dugsigu uu u taageray waxbarashada ilmahaaga iyadoo ay tixgelinayaan baahidooda iyo wixii hore u jiray ka hor intaysan go'aamin inay cayriyaan.

Ka hor intaysan dhicin cayrintu, maamulaha ayaa kula soo xiriiri doona si uu kuugu sheego inay ka fekerayaan cayrinta ilmahaaga. Waxay soo saari doonaan ogeysiis qoraalka cayrinta ah ee la filayo oo ay ku martiqaadayaan adiga iyo ilmahaaga kulan loogu sheegayo sababaha iyo inaad ka hadashid waxa dhici doonaa haddii ilmahaaga la cayriyo. Maamuluhu wuxuu kula wadaagi doonaa dhamaan dukumiintiyada ku khuseeya. Waxaad u soo kaxaysan kartaa kulanka qof kaa taageera kulanka. Qofka taageeradu wuxuu siin karaa adiga iyo/ama ilmahaaga taageero ficil ah ama mid maskixiyan ah.

Taariikhda ogeysiiska qoraalka ka dib waxaad heli doontaa toddobo maalmood oo dugsiga la dhiganayo inaad dugsiga siiso jawaab leh sababaha aan ilmahaaga loo cayrinaynin. Maamuluhu wuxuu isticmaali doonaa jawaabtan ka qayb ahaan gaaritaanka go'aanka.

### Maxaa dhacaya haddii ilmahayga la cayriyo?

Maamulaha, Agaasimaha iyo Hogaanka Waxbarashada ayaa wada go'aansan doona haddii ardayga la cayrinayo. 24 saac gudahood marka la go'aamiyo in la cayriyo ardayga, maamuluhu waa inuu u sheegaa ardayga iyo waalidkood ama xaannaaneeyayaasha oo ay wargeliyaan Wasaaradda Waxbarasgada NSW.

Haddii ilmahaagu uu ka yar yahay 17 sanno oo la cayriyo dabeecadooda awgeed, maamuluhu waa inuu helaa dugsi cusub ama meel kale oo bedel ah si ay waxbarashada u sii wataan 15 maalmood oo dugsiga la dhiganayo gudahood.

Haddii ilmahaagu uu ka weyn yahay 17 sano jir ama ka weyn, adiga iyo ilmahaagu waa inaad raadsataan fursada uu ku sii wadanayo waxbarashada ama shaqo u sii gudbida.

### Maxaa dheeraad ah oo aan ka heli karaa dugsiga?

Waxaad weydiin kartaa dugsiga macluumaad intaas ka sii badan oo ku saabsan wixii dhacay iyo sababta. Dugsigu waa inuu kuu sharxaa adiga sababta ka danbeysa go'aan kasta, waxa dhici doona iyo waxaad sameyn lahayd haddii aad arin qabto.

### Racfaan ma ka qaadan karaa cayrinta?

Haa, haddii aad rumeysan tahay in maamulaha iyo Agaasimaha Hogaanka Waxbarashadu ay gaareen go'aan aan cadaalad ahayn ama aysan raacin nidaam sax ah. Tixraac Ilaha macluumaadka Racfaanka.

Macluumaadka ku saabsan u doodista ilmahaaga ayaa la helayaa, iyo sidoo kale Xeerka Bulshada Dugsiga oo sharxaya siyaalaha dugsiyada loola xiriiro.

### Sidee baan cabasho u sameeyaa?

Haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid cayrinta, go'aamada la gaaray ama taageerada laydin siiyey fadlan ka tixraac website ka wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cabasho sameynta.

### Adeega turjumaanka taleefanka

Haddii aad dooneysid inaad la xiriirtid dugsiga oo aad caawimaad uga baahan tahay Ingiriiska fadlan ka wac adeega turjumaanka taleefanka 131 450, u sheeg luuqadaad u baahan tahay oo weydii xiriiriyaha inuu waco dugsiga. Xiriiriyaha ayaa turjumaan khadka soo gelin doona kaa caawiya wada hadalkaaga. Adeegan lacag lagaama qaadi doono.